# HUBINTA LIISKA DALABKA DIIWAANKA

Isticmaal liiskaan hubinta si ay kaaga caawimo si fiican u buuxinta foomka, dedeji dalabkaaga yarayna codsiyada aan ka hayno macluumaad intaas ka badan.

Isticmaal dalabka diiwaanka oo faahfaahsan si uu kaaga caawimo inaad ka jawaabto su'aal walba oo ku taal foomka diiwaanka, oo laga hello www.acnc.gov.au/registrationguide.

Markaad hubiso mid walba oo liiska ku jira, waxaad bilaabi kartaa dalabka oo ah www.acnc.gov.au/register.

| Haa /Maya | Waxyaallaha la hubinayo | Xasuusinta |
|---|---|---|
| ☐ | Ururkaagu ma mid samafal bixiyaa?<br>■ Si aad u diiwaangeliso ururkaaga maaha waajib in uu ahaado faaiido ma doon, lehna ujeedooyin samafaleed oo ah mid u faaiidaynaya dadweynaha, ama<br>■ Uu leeyahay ujeedooyin samafal iyo weliba ujeedooyin lug ku yeelasho ama la xiriirid iyo kaalmo siina xoojiya ujeedooyinkaas samafalka.<br>**Xasuuso:** cayaaraha, ujeedooyin madadaalo ama bulsho badanaa looma qadariyo samafal. | |
| ☐ | Ma hubisay in ururkaagu aanu lahayn ujeedooyin u diidaya?<br>Ujeedooyinka soo socdaa ma aha kuwa samafala:<br>■ ku lug leh ama kor u qaadaya hawla aan sharci ahayn ama lidi ku ah siyaasada guud<br>■ kor u qaadaya ama diidaya xisbi siyaasadeed ama musharax xafiis siyaadeed. | |
| ☐ | Ma taqaan qaab sharciyeedka ururkaaga (sida la midoobay, aan la midoobin, shirkad dadweyne)?<br>**Xasuus:** ganacsade keli ah, xisbiyo siyaasadeed iyo hay'adaha dawladeed ma mudna inay dalbadaan diiwaangelinta. | |

Australian Government

Australian Charities and Not-for-profits Commission

| | | |
|---|---|---|
| ☐ | Ma leeyahay ururkaagu Australian Business Number (ABN)? Ma xaqiijisay in ABN kaagu:<br>▪ ku qoran yahay magaca saxda ah, iyo<br>▪ In uu muujinayo qaab sharciyeedka saxda ah?<br>Haddii ay khusayso, ma haysataa iyagana nambarka diiwaangelinta ASIC ama ORIC? | |
| ☐ | Ma haysataa dukumiintiga xeerinaya ururkaaga? (tusaale ahaan distuurkiisa, shuruucdiisa, warqada masuuliyada ama xasuusin iyo maqaalada jimciyada). | |
| ☐ | Ma hubisay in dukumintiga xeerintu ka kooban yahay faqrado looga baahan yahay kaalmaynta dalabka ururkaaga?<br>Tusaale ahaan:<br>▪ Hadafyo samafal ah ama faqrada ujeedooyinka<br>▪ Faqrad la xiriirta faaiido ma-doonka<br>▪ Faqrada soo gabagabaynaysa<br>▪ **Faqrada dib u celinta (waxaa loo baahan yahay haddii la dalbado meelmarinta DGR oo Xafiiska Cashuuraha Australia – ATO)** | |
| ☐ | Ma hubisay on magaca u diiwaangashan ururkaaga uu ku haboon yahay ururka? | |
| ☐ | Ma leeyahay ururkaagu:<br>▪ cinwaan shaqo? (kani waa cinwaanka aan kaala xiriiro kuuguna soo dirno dukumintiyada rasmiga ah)<br>▪ faahfaahinta la xiriirida, wax weydiinta waqtiga diiwaangelinta? (kani wuxuu noqon karaa sida cinwaanka adeega) | |
| ☐ | Ma qadarisay nooc-hoosaadka/yada samafalka aad doonayso inaad diiwaangeliso? (kuwaas waa inay yeeshaan hadaf/yo samafaleed)<br>Ururkaaga dukumintigiisa xeerinta, hawlaha iyo diiwaanka kaalmada kuwa ka faaiidaysanaya diiwaanka sida nooc-hoosaayaadyadaan)? | |
| ☐ | Ma doonaysaa inaad u diiwaangeliso ururkaaga Public Benevolent Institution (PBI) ama Health Promotion Charity (HPC)?<br>**Xasuuso:** haddii ay sidaas tahay waxaad u baahan tahay inaad na siiso macluumaad siyaada ah. | |
| ☐ | Ma haysaa faahfaahinta qof walba oo masuul ah oo ka tirsan ururkaaga, macluumaadkaas oo uu ku jiro waqtiga dhalashada, meesha uu degan yahay, nambarka lagala xiriirayo iyo doorkooda?<br>**Xasuuso:** ma daabacno cinwaanka, taariikhda dhalashada ama telefoonka lagala xiriirayo dadka masuulka ah. | |
| ☐ | Ma hubisay in dadkaan masuulka ahi ku haboon yihiin, oo fahmeen in waajib saaran yahay sida waafaqsan mustawayaaska maamulwadaaga ACNC? | |
| ☐ | Ma haysaa faahfaahinta dhaqaale ee ururkaaga: mudada warbixinta dhaqaale, wixii soo gala iyo wixii baxay ee sanad dhaqaaleedkii la soo dhaafay (hadday khusayso) iyo qiyaasta sanad dhaqaalaadka soo socda? | |

| | | |
|---|---|---|
| ☐ | Ururkaagu ma raadinayaa cashuur dhaaf iyo/ama u qadarinta urur hella hadiyada u dhaafida (DGR)? | |
| ☐ | Ma doonaysaa inaad codsato in magacyada iyo dadka masuulka ah ama faahfaahinta qaarkeed la xiriirta ururkaaga lagu hayo Diiwaanka ACNC? **Xasuuso:** Ma aan daabacno cinwaanada ama taariikhaha dadka masuulka ah. | |
| ☐ | Ma fahamtay in ururkaaga samafalku, haddii la diiwaangeliyo, ay waajib tahay in uu raaco mustawayaasha maamulwadaaga ACNC iyo waajibaadka warbixinta? | |
| ☐ | Ma laguu ansixiyey inaad saxiixdo baaqa foomka dalabka diiwaangelinta? | |

## Macluumaad intaas ka badan

Tusaha dalabka Diiwaanka: www.acnc.gov.au/registrationguide

Foomka Dalabka Diiwaanka: www.acnc.gov.au/register

Cashuur dhaafista: www.ato.gov.au/nonprofit

Waajibaadka ururka samafalka: www.acnc.gov.au/ongoingobligations

Mustawayaasha Maamul wadaaga: www.acnc.gov.au/governancestandards


Kala xiriir ACNC

Tel: 13 ACNC (13 22 62)

Email: advice@acnc.gov.au

Warqadaha: Advice Services, Australian Charities and Not-for-profits Commission, GPO Box 5108, Melbourne VIC 3001

Fakis: 1300 232 569


Si aad noogula xiriirto luqad aan ka ahayn Ingiriis, waxaad isticmaali kartaa Adeega Afcelinta iyo Fasiraada (TIS) oo lacag la'aana si aad noola hadasho. Si aad u isticmaasho adeegaan, ka wac TIS 13 14 50 weydiina afceliye si aad nooga soo wacdo 13 22 62.


© Copyright 2015

Waad daabici kartaa, yeellan kartaa, dib u habayn ku samayn kartaa, gudbin kartaa oo qaybin kartaa qoraalkaan sidaad u rabto (laakiin taas macneheedu maaha in ACNC ama Xukuumada Dhexe u ansixisay adiga ama adeegaaga ama badeecado).



Qoraalkani wuxuu shaqaynayey Juulay 2015.